

**Suaashaan Waxaa Ka Soo Jawaabay Fadiilatuu Sheekh DR  
Cismaan Macalin Maxamud Sheekh Cali  
FROM Umu Sufyaan**

**asalamu calaykum suaashaan waxay ku socotaa culimada** waxaan marar badan aan aragnay alshabaab oo afka u duuban islamrkaasna salaad dukanayaan, ma banaantay in salaada dhexdeeda afka la duubto, maxaase keenay alshaab iney wajiga qarsadaan hadayba og yihiin iney xaq ku dagaalamayaan oo ale raali ka yahay culimada i weydiya

**Jawaab:** Culimadu waxay yiraahdeen waa wax la neceb yahay (Makruuh) in afka la daboosho marka la tukanayo.

Waxaana ku soo arooray xadiith sheegaya in Rasuulku nabadgelyo iyo ammaani korkiisa ha ahaatee uu diiday in afka la daboosho salaadda dhexdeeda.

Abuudaawuud (643) iyo ibnumaajah (966) ayaa weriyay, waana xadiith sugan. erayada ibn maajana waa sidan:

عن أبي هريرة رضي الله عنه، قال: نهى النبي صلى الله عليه و سلم أن يغطي الرجل فاه في الصلاة.

Imaam Maalik wuxuu kitaabkiisa muwadda'a (xadiithka tirsigiisu yahay 30) ka weriyay cabdiraxmaan ibn al-mujabbar in adeerkiis saalim oo ahaa wiilkii Cabdillaahi ibn cumar kana mid ahaa toddobadii caalin ee fiqiga looga danbeeyay magaalada Madiina waqtigii Taabiciinta, haddii uu arko qof afku u daboolan yahay salaadda dhexdeeda uu si xooggan uga soo dhufan jiray marada afka ugu duuban. Culimadu waxay yiraahdeen arrintaa waxaa laga qaadanayaa laba waxyaabood:

1- munkarki oo uu gacantiisa wax uga qabtay, iyadaana ku xoog badan wax baridda, illeen wuxuu ahaa nin imaam ah cilmigana looga danbeeyo, wax fitna ahna ka dhalan meyn arrinkaa.

2- tan kalena waxay tahay in xumaanta afdaboolashada salaadda dhexdeeda ay ahayd arrin magaalada madiina laga yaqaannay.

Jacda ibn hubyra isna nin salaadda dhexdeeda wejiga cimaamad ku dabooshay ayuu ka tuuray cimaamaddii iyo koofi bireed madaxa u saarnayd.

Ibnul-mundir wuxuu ku yiri kitaabkiisa awsad ka la yiraahdo: culimo badani way dhibsadaan in afka la daboosho salaadda dhexdeeda, ragga arrintaa laga weriyayna waxaa ka mid ah: ibnucumar, abuurayra, waxaa sidaas oo kale yiri: cadaa'a, saciid ibn musayyaba, ibraahiim al-nakhaci, saalim ibn cabdillaah, shacbi,

xammaad ibn abii sulaymaan, awzaaci, maalik, axmad ibn xanbal, isxaaq ibn raahaweyhi, xasanna laba qowl ayaa laga weriyay (mid ka mid ahise wuu khilaafsan yahay xadiithki aan soo sheegnay) .

Wuxuu kale oo uu yiri ibnul-mundir: dhammaan culimada warkoodu i soo gaaray waxay wax la neceb yahay u arkeen in sanko iyo afka la daboolo salaadda dhexdeeda, xasan ma ogye oo isagu diiday in sanko iyo afkaba la wada daboolo, oggolaadayse afka dabooliddiisa.

Imaam Maalik wuxuu leeyahay ma wanaagsana in afka la daboolo salaadda dhexdeeda, haddaan salaad la tukanayna ma ahan dhaqan akhyaareed in afka la duubto. Sidaas waxaa yiri imaam Maalik.

Dadku wax xun ayay ka maleynayaan qofka wejiga duubta, oo waxay is leeyihiin tolow muxuu dhagar damacsan yahay.

Culimada qaarna waxay ku sheegeen xikmada loo diiday in afka la daboolo salaadda dhexdeeda si aan loogu ekaannin nimanka dabcaabudka ah marka ay cibaadeysanayaan.

Waxaa kaloo lugu sheegay xikmadda loo diiday arrinta doonis la doonayo in wejigu dhulka taabto.

Arrinta shabaabka ku saabsan ee aad weydiinayso haddey is hubaan in ay xaq ku taagan yihiin maxay wejiga u qarsanaan, waxay ku fiicnaan lahayd in iyaga la weydiiyo. Dadkuse waxaa muuqata in ay ka aaminsan yihiin in ay cabsiyi u geysay arrintaas .

Qofkii cudur daar leh waa meeshiisa (sida in qabow darani jiro, ama qofka xasaasiyadi heyso), saddex meeloodse wejiga lama daboolo:

1-Salaadda.

2-Janaazada.

3-Jihaadka.

Sidaas waxaa ka soo guuriyay dadki asaga ka horreeyay in ay dhibsan jireen arrimahaa cadaa'a ibn saa'ib. fiiri musannafka ibn abii shayba (7389).

More Suaalo & Jawaabo Halkaan Kaga bago

[www.manhajonline.com](http://www.manhajonline.com)

[ahmed@manhaj.info](mailto:ahmed@manhaj.info)

[adam@manhaj.info](mailto:adam@manhaj.info)